


16. Annaguna waannu kaydi (Abaal-marin).

17. Ee u sug Gaalada wax yar.

وَكَذَّبُكُمْ

فَهُمُ الظَّاهِرُونَ أَنَّهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ

Naf walba waxaa ilaaliya Malag'waana la xisaabin doonaa Maalinta wixii qarsoona la faydi, ee waa in Qalbiga, Niyada, iyo Camalkaba la wanajaayaa, xumaan, dhagar iyo khiyaamana laga fogaado, illeen Eebe Cidna kama fakatee. Adh-Dhaariq (1-17).



Magaca Eebe yaan ku billaabayaanaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waynee Magaca Eebe ee Sarreeya.

سَجَّحَ أَسْمَرَيَكَ الْأَعْنَىٰ

الَّذِي خَلَقَ فُسُوْئِي

2. Eebaha abuuray khalqiga ekeeyayna.

وَالَّذِي قَدَرَ فَهْدَىٰ

وَالَّذِي أَخْرَجَ الْمَرْءَ

3. Eebaha wax walba qaddaray Jidkana tusiyeey.

فَجَعَلَهُ عَثَّةً أَحَوَىٰ

4. Eebaha soo bixiya Daaqa.

سُقْرِنُكَ فَلَانَتَسَىٰ

5. Kana dhiga markaas ka dib caws ingagagan oo Madow.

إِلَامَاشَاءَ اللَّهُ إِنَّهُ يَعْلَمُ الْجَهَرَ وَمَا يَعْنَىٰ

6. Waxaan kuu akhriyaynaa Quraanka halmaaminamaysid.

وَنِسِرُكَ لِلْيُسْرَىٰ

7. Wuxuu Eebe doono mooyee, Eebana waa ogyahay waxa muuqda iyo waxa qarsoonba.

فَذَكَرَ لِنَفْعَكَ الْذِكْرَىٰ

8. Waxaana kuu fududaynhaynaa Waddo siican.

سَيِّدُكُرُّ مَنْ يَعْنَىٰ

9. Ee wax waani (Nabiyow) markay wax tari waanadu.

10. Waxaa waantoobi Ruuxa Eebe ka yaabee.

11. Wuxaan ka fogaan waanada Ruuxa xune.

وَتَجْهِيْهَا الْأَسْفَىٰ ﴿١١﴾

12. Ee ah mid gali Naar wayn.

الَّذِي يَصْلِي أَنَّارَاتِ الْكُبْرَىٰ ﴿١٢﴾

13. Oon kuna dhimanayn dhexdeeda kuna noolaanayn.

ثُمَّ لَا يَمُوتُ فِيهَا وَلَا يَحْيَىٰ ﴿١٣﴾

14. Wuxaan liibaanay Ruuxii Daahir noqda.

قَدْ أَفْلَحَ مَنْ تَرَكَ ﴿١٤﴾

15. magaca Eebana Xusa, Salaaddana tukada.

وَذَكَرَ أَسْمَرَيْهِ فَضَلَّ ﴿١٥﴾

16. Saas ma'aha ee Dadku wuxuu doortay nolosha Adduunyo ee dhaw.

بَلْ تُؤْمِنُونَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا ﴿١٦﴾

17. Aakhiraase khayr badan baaqina ah (hadhi).

وَالآخِرَةُ خَيْرٌ وَأَبْقَىٰ ﴿١٧﴾

18. Arrintaasuna waxay ku sugantahay Kutubtii hore.

إِنَّ هَذَهُ الْفِتْنَةُ أَشَدُّ الْأُرُورَ ﴿١٨﴾

19. Kutubtii (Nabi) Ibraahim iyo (Nabi) Muuse.

حُكْمُ إِبْرَاهِيمَ وَمُوسَىٰ ﴿١٩﴾

Eebaa sharaf badan, Magaciisuna sidoo kale waa sharaf badanyahay, wax walbana isagaa qadaray, Jidkana isagaa kala caddeeyay, Ruuxii fiicanna tan sanbuu qaadi, Ruuxii xunna tan daran bu qaadi, wuxuuna ku noolaan maddisha ma noolayso, Liibaan waxaa leh Ruuxii Mu'min noqda xuska Eebe iyo Salaaddiisana badiya, nolosha Adduunyana ayna khalqad, illeen Aakharaa fiicane, Waxaa la soo sheegayna waxay ku sughayd Kutubihii hore, Sida: kii Nabi Ibraahim iyo Nabi Muuse. Saxiixu Muslim waxaa ku suggaaday: «Eebe wuu qaddaray maamulka khalqiga Abuuridda Samaawaadka iyo dhulka ka hore Konton Kun oo Sano, Carshigisuna wuxuu aha Biyaha korkooda». Al-Aclaa (1-19).

Suurat Al-Ghaashiyah

سُورَةُ الْغَاشِيَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabayaan ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Ma ku soo gaadhey Qiyaamada warkeedii.

هَلْ أَنْكَ حَدِيثُ الْغَشِيشَةِ ﴿١﴾